

Ogeysiiska Qarsoodi Ka Dhigista Macluumaadka ee Xarunta Bulshada ee Barashada ee 21st Century

Gobolka Minnesota waxaa gargaarka dawladda dhexe iyada oo Waaxda Waxbarashada ee Mareykanku u sii mariso ¹ Xarunta Waxbarashada Bulshada ee (21st CCLC) ee deeqda loo fidiyo hay'adaha bixiya barnaamijyada waxbarasho oo aan aheyn waxbarashada dugsiyada ee dhalinyarada. 21st CCLC's waxaa waajib ku ah in ay ururiso macluumaadka dadka ka qeyb qaadanaya barnaamijyadaas. Ururinta macluumaadkan waxa ay qeyb ka tahay dadaalka lagu horumarinayo sida ay barnaamijyadu u noqon lahaayeen kuwo taabagal ah, iyo horumarinta tayada iyo helitaanka barnaamijyada lagu taageerayo dhalinyarada iyo qoysaska Minnesota.

Waa maxay macluumaadka shaqsiga ah oo laga doonayo ilmahaaga?

- Macluumaadka barnaamijyada ka baxsan tan dugsiya ee ilmahaagu qaato, oo ay ka mid yihiin inta maalmood oo uu ka qeyb qaatay.
- Macluumaadka dadweynaha sida qowmiyadda iyo da'da ilmaha, kuwaas oo Waaxda Waxbarashada ee Minnesota u adeegsaneyso in ay ku ogaato ardayda kale ee dugsiya dhiganaya iyo natiijada imtixaanada; iyo
- Jawaabta ay ka bixiyaan sahanka ku saabsan waayo aragnimada ay kala kulmeen barnaamijka iyo waxyaabaha ay ka qeyb qaateen. Sahankaas waxaa la qaadaa 1-2 jeer sanadkii kaasoo laga qaado qaar ka mid ah ardayda barnaamijyada 21st CCLC.

Yaa arki kara macluumaadka shaqsiga ah ee la soo ururiyey?

Macluumaadka waa qarsoodi waa mid ku kooban oo kaliya in loo isticmaalo ujeedada loo ururiyey. Dadka arki kara macluumaadkaas waxaa ka mid ah:

- Shaqaalaha bixiya barnaamijyada ilmahaagu ka qeyb qaato si ay ugu fidiyaan barnaamijyada;
- Shaqaalaha Health Community Initiative oo dabagal ku sameeya xogta iyo warbixinta deeqda;
- Hanti dhawrayaasha oo sharcigu u ogol yahay in ay ay eegan hawlaha ay barnaamijyadu qabtaan;
- Shaqaalaha Waaxda Waxbarashada ee Minnesota u adeegsanaya macluumaadka in ay ku fahmaan sida barnaamijku u shaqeynayo oo warbixin uga qoraan; macluumaadka (gaarka ah) ee ilmahaaga marna kama mid aha warbixinta; iyada
- Dadka kale ay arki karaan oo kaliya marka sharciga u ogolaado (sida amarka ama ogolashaha maxkamadda).

Dhamaan hay'adaha ku xusan kor waxa ay ogolaadeen in aysan u ogolaan hay'adaha kale in aysan heli karin macluumaadka aanu soo ururino haddii aanay ogolaasho ka heysan waalidka ilmaha.

Waa maxay xuquuqda la xiriirta xogta ay ururiyeen 21st CCLC?

- **Haddii aad dooneyso in macluumaadka ilmahaaga aan lagu darin warbixinta barnaamijyada 21st CCLC, la socodsii shaqaalaha, saxiix foomkan, una soo dir <ADD SCHOOL>.** Ilmahaagu weli wuu ka qeyb qaadan karaa barnaamijyada adiga oo saxiixay foomkan diidayna in xogtiisa la ururiyo.
- Xaq waxa aad u leedahay in nuqul (koobi) lagaa siiyo macluumaadka la ururiyey ee ilmahaaga.
- Waxa aad xaq u leedahay in aad sixi karto xogta ku saabsan ilmahaaga.
- Haddii aad aaminsan tahay in lagu xad gudbay qarsoodi ka dhigista macluumaadka ee ilmahaaga, xaq waxa aad u leegahay in aad ka diiwaangeliso barnaamijka cabasho ama Waaxda Waxbarashada ee Minnesota: ATTN (ku soo hagaaji): Data Practices Compliance Officer, Minnesota Department of Education, 1500 Highway 36 West, Roseville, MN 55113

Haddii aad dooneyso in xogta ilmahaaga aan lagu darin/ama loo adeegsan warbixinta ama qiyaasta barnaamijyada dheeraadka ah ee waxbarashada dugsiyada, fadlan halkan hoose saxiix.

Magaca ardayga (magaca oo sadexan): _____

Taraiikhda dhalashada ardayga: _____

Saxiixa (waalidka ama mas'uulka ka ah haddii aanu ardaygu gaarin 18): _____

Taariikh _____